

Mudantiinta sharafta leh ee reer Kristiansand oo asalkoodu Soomaalida yahayow

Haddii aan nahay degmada(kommunka) waxaa nasoo gaara su'aalo iyo waydiimo badan oo dhankiina nooga yimaada waxaan rabnaa in aan jaaniska ka faa'iideysano oo aan idiin soo gudbino warbixin gaaban oo kooban.

Sidaad ogtihiinba waxaan ku noolnahay waqti aan ku qasbanahay in aan xaddidaad xoogan saarno xirriirka ama isdhexgalka bulshada. Oraahdu sidaad hubaashii horey umaqasheenba waxay ku caantahay ama loo yaqaan <<kala dheereynta bulshada>>.

Dhibku wali wuu jiraa wuuna taaganyahay mana joojin karno in aan si dhab ah/taxadar leh u qaadano. Degmadu waxay isku dayeysaa sida ugu macquulsan inay hawleheedii/deeqeheedii u gudato, qaar idinka mid ihi waxay ogaan doonaan in wax barashada iskoolku ay ka socon/kabixi doonto aalaada internetka. Degmadu waxay leedahay shaqaale badan, kuwo badan oo ka mid ihina waxay kasoo shaqeyn doonaan guryaha. Taas micneheedu waa in aad la xirriiri kartaan su'aalihii ay idiinka jawaabi doonaan. Haddii aad awoodid waxaa la doorbideyaa in aad taleefan kala xirriirtid xaalada lagu jiro awgeed

Waxaana soo gaarey su'aalooyin ku saabsan qalabka difaaca cudurada, sida aalaada afka iyo sanku lagu daboolo iyo alkoholka gacmaha lagu nadiifiyo ee jeermiska disha

Aalada afka iyo sanku lagu daboolo: Aaladaani ma lahan difaac fiican oo muddo joogeya waxaana loogu talagaley kaliya dadka caafimaadka ka shaqeeya in ay isticmaalaan

Alkoholka gacmaha: Aad ayey u adagtahay in la helo. Meelkasta oo lagu gadi/iibin jirayna way ka dhamaatey, degmaduna majirto wax gacan ah oo ay geysan karto helintaankeeda. Waxaa aad u wanaagsan oo la ogaadey inay sabuunta iyo bihyuhu ka waxtar badanyihiin alkoholkaas. Tallada ugu fiican oo aan idin siin karno waa in aad gacmaha markasta dhaqdaan sifiicana udhaqdaan

Dad ayaa nasoo weydiiyey muddada ay qaadan karto xaddidaadu. Taasna macquul ma aha in laga jawaabo, laakiin dawladu waxay shalay tiri ku xisaabtama inay xaddidaaduhu/xiyiraaduhu socon doonaan ilaa iyo fasaxaha Booskaha(Påske), taariikh ahaan waxay noqoneysaa ilaa iyo 13ka Abriil 2020. waxaa imaan doona warbixino cusub oo marxalada ku saabsan intaan waqtigaas la gaarin.

12. maarso 2020 dawladu waxay dejiisay waxqabadyo badan danta ama rajada laga lahaa waxqabadyadaasna waxay aheyd in cudurka/viruska la istaajiyo. Xaddidaadyadaan/xayiradahaan waa kuwii ugu adkaa ama ugu qalafsanaa oo la dejiyo intii dalka Norway nabadu ka jirtay. Sidaan sheegneyna waxay quseeyaan ilaa iyo 13. Abriil. Qodobada ugu muhiimsana waa:

- Waa in ay dadkoo dhamaa kala fogaadaan ugu yaraana isu jirsadaan 1 mitir
- waqtiya banaanka joognana waa in aanaan ka badan **5 qof**
Guruubkiiba
 - Ha iskula jimicsanina guruubo badan ama dad badan, xafladana ha dhiganina
- Waa muhiim inaad gacmaha dhaqatid markasta sifiicna udhaqdid. Dhago gacmaha markaad banaanka adeysid, isla markaad guriga soo qashid iyo ka kahor intaan cunteyn. Isku day xitaa in aad ka dheeraato in aad wajigaaga taabato
- Haddii hargab ku hayo ama dhuuntu/cunuhu ku xanuuneyo, guriga ayaad joogeysaa ilaa hal maalin kadib markaad caafimaadey

Isu naxariista

Salaan qaali ah

Kim Henrik Gronert

La talliyaha/isku xirraha dhaqamada kala duwan ee degma Kristiansand